# MAALIYADDA KAALMADA KIRADA BOSTON

## *Su'aalaha Xaq u Yeelashada*

**1**

Adiga ma tahay kireesge raadinaaya kaalmada kirada iyo/ama danabka meesha aasaasiga aad daggan tahay, ee ku yaal magaalada Boston?

MAYA → **XAQ UMA LAHA:** Kaalmada waxaa loogu talogalay kirada iyo/ama danabka guryaha aasaasiga keliya ee ku yaal Magaalada Boson.

HAA ↓

**2**

Dakhliga reerkaada ma ka yar yahay ama ma la'eg yahay 80% AMI marka loo fiiriyo tirada reerka?

Fadlan xasuuso in ardayda waqtiga buuxa ee ku qoran kulliyadda ama ka qalin jebiyay darajada labaad jaamacadda in aysan xaq u lahayn kaalmada RRF.

Dadka daggan guryaha dadweynaha waa in ay maamulaha hantidooda kala xariiraan brograamka lacagaha ku aruuray ee kirada Madaxda Guriyeynta Boston (Boston Housing Authority).

MAYA → **XAQ UMA LAHA:** Waa in la xaqiijiyo dakhliga reerka ee ku sguan ama ka yar 80% AMI.

HAA ↓

**3**

Ma jiraa qof ka tirsan reerkaada oo muujin kara halista guri la'aanta ama dagganaasho la'aanta guriyeynta? Kana mid ah:

- Ogeysiiska (Ogeysiisyada) danabka la soo dhaafay/kirada
- Ogeysiiska ka-saaridda
- Xaaladaha nolosha aan ammaan ama aan caafimaad lahayn
- Yareynta dakhliga reerka
- Kharashka badan reerka taasoo ugu wacan COVID-19

MAYA → **XAQ UMA LAHA:** Reerka waa in uu muujiyo halista guri la'aanta ama dagganaasho la'aanta guriyeynta.

HAA ↓

**4**

Ma jiraa qof ka tirsan reerka oo la kulmay saamayntaan maaliyadda oo la xariirta COVID 19? Kana mid ah:

- Yareynta/luminta dakhliga
- Kordhinta kharashka
- Halista badan ee la xariirta ku dhawaashada COVID-19
- Xaq u leh manaafacaadka shaqo la'aanta

MAYA → **XAQ UMA LAHA:** waa in lala kulmo mid ka mid ah xaaladahaan.

HAA ↓

**HADDII AAD "HAA" KU JAWAABTAY DHAMAAN 4TA SU'AAL,
WAXAA DHICI KARTO IN AAD XAQ U YEELATID KAALMADA KIRADA.**

*Ka hor inta aadan bilaabin arjiga, fadlan soo aruuri warqadaha soo socdo/macluumaadka: sawirka madaxa reerka, koobi saxiixan oo ku saabsan kirada iminka socota ama heshiiska dagganaha, dabada jeegga iminka socda (labadii ugu dambaysay), liis dhamaystiran oo ku saabsan xubnaha reerka, liis dhamaystiran oo ku saabsan ilaha dakhliga, iyo macluumaadka lagala xariira maamulaha milkiilaha/maamulaha hantida.*